# Wadankee ayaa mas'uul ka ah codsigaaga magangelyo?

Dacwada Dublin

**Maxaa laguu siinayaa qoraalkan?**
Waxaad magangelyo ka weydiisatay Nederlaan. Laakiin waxaa suura al ah in wadan kale yahay inuu ka go'aamiyo haddii aad magangelyo xaq u leedahay. Wadanka mas'uulka ka ah inuu ka hawl galo codsigaaga magangelyo. Tani waa Sharci Yurubiyanka ah.
Waxaa halkan ku qoran tusaale ahaan in wadanka uu codsigaaga magangelyo mas'uul ka yahay xaaladahan soo socda:

- Qof ajaanib ayaa marka ugu horeysa weydiistay magangelyo wadankan.
- Qof ajaanib ayaa u safray si sharco daro ah Yurub asagoo wadankan soo maray.
- Qof ajaanib ayaa heysta fiiso wadankan ama wadankan inuu soo maro.

Waxaa boliiska (AVIM) iyo/ama boliiska (KMar) baarayaan haddii wadan kale oo Yurub ah uu mas'uul ka yahay. Shaqaalaha boliiska iyo/ ama Kmar:

- ayaa kaa qaaday dokumentigaaga si ay u soo baaraan. Iyagaa waxey fiirinayaan inaad imaanshahaaga Nederlaan ka hor wadan kale oo Yurub ah aad aaday. Ama aad fiiso heysato oo wadan kale oo Yurub ah.
- waxey kaa qaadeen astaanta faraha. Waxey baarayaan iney faraha nidaamka kambiyuutarka Eurodac ama VIS ay ku jiraan. Waxaa nidaamyadan ku jira faraha dhamaan dadka magangelyo ka weydiistay ama fiiso wadan Yurub ah la siiyey.

Baaritaanada waxaa ka soo bixi kara in wadan kale oo Yurub ah inuu mas'uul ka yahay codsigaaga magangelyo. Waxaa IND ay baareysaa haddii wadan kale oo Yurub ah uu waajib ku tyahay inuu ka hawl galo codsigaaga magangelyo. Sidaa awgeed ayaa u geleysaa dacwada Dublin. Dacwadan wey ka duwan tahay sida qoraalka "waxaad rabtaa inaad magangelyo weydiisato. Is dhiibitaan iyo mudada nasashada iyo is diyaarinta iyo qoraalka "codsigaaga magangelyo. Warbixinta Dacwada guud ee magangelyada"waxa ku qoran. Waxaad qoraalkan ka aqrineysaa sida ay wax u dhacayaan dacwada Dublin.

## Ka dib markaad is qorto magangelyodoon ahaan

Waxaad magangelyo ka weydiisatay Nederlaan. Shaqsiyadaada, oo ah qofka aad tahay ayaa la sugayaa. Warbixintaada ayaa dowlada gelisay nidaamka (diiwaangelin). Iyo IND waxey xadiday inaad mareyso dacwada Dublin maadaama wadan kale oo Yurub ah uu mas'uul ka noqon karo codsigaaga magangelyo. Sidaa awgeed ayaa IND waxaa suura gal ah iney sii weydiiyeen in ay dacwadaada magangelyada la wareegaan ama dib u ceshadaan.

## Wareysiga Dublin

Waxaad rasmi ahaan leedahay 1 wareysi oo shaqaalaha IND oo ku saabsan shaqsiyadaada, jinsiyadaada ama jidka safarka. Tani waa wareysiga Dublin. IND waxey kuu sheegeysaa waxa ka soo baxay baaritaanka dokumentiyadaada iyo astaanta faraha. Iyo arrintanna dhowr su'aalo ayaa lagaa weydiin doonaa, tusaale ahaan haddii aad wadan akle oo Yurub ah magangelyo ka weydiisatay. Su'aalahan kuma saabsanao sababta aad wadankaaga aad ka soo jeedo uga tagtay. Wadahadalkan waxaad ku sheegi kartaa sababta aad ugu aragto in Nederlaan ay codsigaaga magangelyada ay u fiiriso. Iyo wixii aad ka qabto oo aad uga soo horjeedo in wadankaa kale laguugu wareejiyo, tusaale ahaan xaalado caafimaad darteed. Ku wareejinta waxaa micnaheeda tahay inaad adiga aadeyso wadanka mas'uulka ka ah inuu ka hawl galo codsigaaga magangelyo.

**Tarjumaan**
Wadahadalka IND waxaa caawinaaya tarjumaan (oo taleefoonka ah) Tarjumaan. Waxaa IND su'aalaha kugu weydiineysaa af Nederlaanka. Tarjumaanka ayaa ku tarjumaaya luqada adiga aad fahmeyso. Tarjumaanka ayaa jawaabtaadana u tarjumaaya luqada Nederlaanka. Tarjumaanka waa madax banaan yahay, uma shaqeeyo IND oo wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyada. Muhiim: isla markii sheeg haddii aad adiga iyo tarjumaanka aad si fiican isu fahmeynin. Markaa IND ayaa tarjumaan kale kuu abaabulaaya. Waa muhiim inaan wax is afgaran waa aysan abuurmin adigoo su'aasha si fiican u fahmin darteeda. IND waxey ka sameynayaan qoraal wareysiga Dublin.

**Go'aaminta**
Wareysiga Dublin ka dib waxaa IND go'aamineysaa haddii wadan kale uu mas'uul ka yahay codsigaaga magangelyo. Natiijada go'aankan ayaa xadidaaya sida ay dacwadaada magangelyo u socon doonto. Waxaa jira 2 arrin oo suura gal ah:

1. Waxaa IND go'aamineysaa in Nederlaan mas'uul ka tahay ka hawl gelida codsigaaga magangelyo. Dacwadaada magangelyo waxey u socon doontaa sida ku qoran qoraalka "Codsigaaga magangelyo. Warbixinta Guud ee dacwada magangelyodoonka".
2. Waxaa IND go'aamineysaa in wadan kale mas'uul ka yahay ka hawl gelida codsigaaga magangelyo. Ma weydiinin IND wadanka kale iney kala wareegaan ka hawl gelida codsigaaga magangelyo ama dib u ceshadaan? MArkaa IND waxey taasi sameyn doontaa wareysiga Dublin ka dib. Taasi waxaa la yirahdaa 'codsiga kala wareegida ama dib u ceshashada'. Halkan hoose ayaa ka aqrineysaa sida uu dacwada Dublin ee Nederlaan xaaladan oo kale u socon doono.

## Go'aanka koowaad (waxa la damacsan yahay)

Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqad ah waxa la damacsan ee IND. Waxa la damacsan yahay waa go'aanka koowaad. Halkan waxaa ku qoran in INDay qorshahooda tahay iney codsigaaga magangelyo aysan ka hawlgelin. Taasi waxaa keenaaya maadaama Nederlaan aysan mas'uul ka ahayn ee wadan kale yahay inuu ka go'aamiyo. Warqada waxaa ku qoran sababaha go'aanka koowaad iyo wixii saameyn ay kuu leedahay.

## Ka wadahadalka wareysiga iyo waxa ay damacsan yihiin

Garyaqaankaaga ayaa kuu aqrinaaya qoraalka wareysiga Dublin iyo waxa ay damacsan yihiin. Sidoo kale wadahadalkana waxaa jooga tarjumaan wada tarjumaaya dhamaan wixii adiga iyo garyaqaanka ka wada hadleysiin. Sidoo kale wadahadalkana waxaa jooga tarjumaan wada tarjumaaya dhamaan wixii adiga iyo garyaqaanka ka wada hadleysiin. Garyaqaankaaga ayaa IND ka dib u diraaya qoraalka jawaabta. Tani waa warqad oo aad si rasmi ah adiga iyo garyaqaanka uga jawaabeysaan waxa ay damacsan yihiin IND. Warqadan ayaa ku sheegi kartaa sababta aad ugu raacsanayn waxa ay damacsan yihiin.

## Go'aanka

Marka la aqriyo warqada jawaabta waxaa IND go'aamineysaa in waxa la damacsan yahay wax laga bedalaayo. Natiijada go'aankan ayaa xadidaaya haddana sida uu dacwadaada magangelyada u socon doono. Waxaa jira 2 arrin oo suura gal ah:

1. Haddii ay IND ku sii joogto iney wadan kale uu mas'uul ka yahay ka howlgelida codsigaaga magangelyo. Wadanka kale wey rabaan iney ka hawlgalaan codsigaaga magangelyo oo ay kala wareegaan Nederlaan. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqad ka socda IND. Taasi waxa lagu magacaabaa go'aanka ama go'aanka rasmiga. Halkan waxaa ku qoran in INDay qorshahooda tahay iney codsigaaga magangelyo aysan ka hawlgelin. Halkan waxaa ku qoran waxa saameyn ay tani kugu yeelan doonto. Waxaa kaloo ku qoran waxa aad sameyn karto haddii aadan ku raacsanayn goáanka. Waxaad aqrineysaa wixii aad sameyn karto si aad ugu noqoto wadanka mas'uulka ka ah. Garyaqaankaaga ayaa kaala hadlaaya go'aankan.
2. Marka ay aqriyaan warqada jawaabta waxaa IND u arkaan in Nederlaan mas'uul ka tahay ka hawl gelida codsigaaga magangelyo. Markaa dacwada Dublin kuma quseyso adiga markaa waxaa aadeysaa Dacwada Guud magangelyadoonka ee Nederlaan. Waxaa lagu siinayaa qoraal kale oo warbixin ah oo dacwadan ah haddii aadan taasi weli helin.

## Ka dib go'aanka Dulin

Ma wadan kale ayaa ka mas'uul ah codsigaaga magangelyo? Markaa wadankaasi ayaa codsigaaga magangelyo ka go'aaminaayo. Taasi waxey micnaheeda tahay inaad aadeyso wadankaasi, ama aad ku noqoneyso haddii aad hore u aaday. Markaa waxey IND weydiineysaa Waaxda Dib u Noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V) iney safarkan abaabulaan. Waxaa 6 bilood gudahooda laguu celinaa wadanka mas'uulka ka ah ee oggolaaday.
Xaaladaha qaarkood mudadan waa la dheereyn karaa. Ma ka weydiisatay xaduudka Nederlaan magangelyo (xagga hawada-ama dekeda badda)? Ma ku jirtaa xabsiga aaanibta oo ma weydiisatay magangelyo? Markaa ku wareejinta waxey qaadaneysaa ugu dambeyn 6 wiig. Ma rabtaa inaad ka hor ugu noqoto wadankan? Markaa ogeysii DT&V inaad rabto inaad la shaqeyso dib u noqoshada iqtiyaariga ah. Markaa ayaa DT&V abaabuleysaa in sida ugu dhaqsaha badan laguugu wareejiyo wadanka mas'uulka ka ah.

**Racfaan**
Racfaan ayaa ka qaadan kartaa adigoo la tashanaaya garyaqaankaaga haddii aadan go'aanka IND ku raacsanayn. Taasi waxey micnaheeda tahay in aad si rasmi ah xaakinka u ogeysiineysid inaadan ku raacsanayn go'aanka IND. Garyaqaankaaga ayaa ku qoraaya waxyaalaha aad ka sheeganeyso ku wareejinta wadanka mas'uulka ah. Go'aanka xaakinka guud ahaan laguuma oggola inaad Nederlaan ku sugto. Waxaad kaloo xaakinka weydiin kartaa inaad mudada dacwada socoto Nederlaan ku sii sugto. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawinaaya. Xaakinka wuxuu baarayaa ka dib in IND ku dhaqantay sharciga Nederlaan u degsan marka ay go'aanka gaarayeen ee codsigaaga magangelyo.

## Ururadee ayaa la kulmeysaa?

Waxaa **Centraal Orgaan opvang asielzoekers** (COA) ayaa dejinta iyo hagista u qaabilsan mudada dacwada maganglyodoonka ee magangelyodoonada Nederlaan. Waxaa kaloo ay COA u qaabilsan tahay inaad hesho cunto iyo ceymiska daryeelka caafimaadka. COA ayaa kaa caawin karta la xariirka dhaqtarka. COA waa urur madaxbanaan mana go'aamiyaan codsigaaga magangelyada.
www.coa.nl

**GezondheidsZorg Asielzoekers** (GZA) waa ururka aad aadeyso haddii aad jiran tahay ama su'aalo caafimaad aad qabto. Waxaa xerada COA dhexdeeda ama agagaarkeeda ku yaala xarunta caafimaadka GZA. GZA ayaa kuu sameynaaya ballamada caawisada dhaqtarka, kalkaalisada, la shaqeeyaha dhaqtarka GGZ ama dhaqtarka qoyska.
www.gzasielzoekers.nl

**VluchtelingenWerk Nederland** (VWN) waa urur madaxbanaan oo xaquuq insaanka u dooda oo waxaa loo sameeyey iney danaha magangelyodoonka. VWN waxey bixisaa warbixin iyo faahfaahin dacwada magangelyada, wargelisaa iyo taageertaa shaqsi ahaan marka lagu jiro dacwadan iyo wey dhexdhexaadisaa marka ay dhibaato ka jiraan ururo kale. Iyo waxey si aad ah ula shaqeeyaan garyaqaankaaga. VWN kama go'aaminayaan codsigaaga magangeyada.
www.vluchtelingenwerk.nl
www.refugeehelp.nl

Waxaa De **Raad voor Rechtsbijstand** (RvR) kuu sameynayaan inaad caawino ka hesho garyaqaan haddii aadan adiga iska bixin karin. Markaa RvR ayaa bixinaaya qarashka garyaqaankaaga caawinaada uu ku siinaayo. Garyaqaanka uma shaqeeyo RvR.
Garyaqaanka waa caawiyaha aarimaha sharciyada oo madax banaan kaana caawinaaya dacwada magangelyada.
www.rvr.org

**Adeega Imigreshanka iyo Jinsiyada** (IND)Waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. IND waxey baaraan haddii aad xaq u leedahay magangelyo Nederlaan ka hesho. Sidaa awgeed ayaa wadahadalada ula leedahay shaqaalaha su'aalo ku saabsan qofka aad tahay. Iyo sababta aad Nederlaan magangelyo uga weydiisatay. IND ayaa baareysa arrintaada shaqsiga iyo xaalada wadanka aad ka timid. Ka dib ayaa IND go'aamineysaa inaad (muddo) Nederlaan joogi karto iyo in kale.
www.ind.nl

Dhismayaasha IND iyo xeryaha COA waxa jooga shaqaalaha **sikuuritaga.** Waxaad ku aqoonsaneysaa labiskooda gaarka. Waxey u joogaan amaankaaga. Iyagana su'aalo ayaad weydiin kartaa ku saabsan waxa la oggol yahay iyo waxa aan la oggolayn xarumaha IND iyo COA. Shaqaalahan sikuuritaga wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyo.

**Dienst Terugkeer en Vertrek** (DT&V) waa qeyb ka mid ah Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan iyo waxey mas'uul ka yihiin maamulka dib u noqoshada Nederlaan.
www.dienstterugkeerenvertrek.nl

**Ururka Caalamiga ee Muhaajiriinta** (IOM) waa urur madaxbanaan oo dunida oo dhan dadka muhaajiriinta ayey caawiyaan. IOM waxey kaa caawini karaan marka aad si isku filnaan aad Nederlaan rabto inaad uga baxdo. IOM waxey ku siinayaan warbixin ku saabsan dib u noqoshada iyo la qabsashada iyo hagista iyo abaabulka ka bixida Nederlaan. Waxaad si toos ah ula xariiri kartaa IOM, DT&V, VWN ama garyaqaanka si ay kuu caawiyaan.
www.iom-nederland.nl

**Dienst Justitiële Inrichtingen** (DJI) waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. Waxaa keliya aad ururkan la kulmeysaa haddii aad xaduudka magangelyo ka weydiisatay. Markaa waxaad joogtaa xero xiran oo la ilaaliyo: waa xeryaha xaduudka ee la seexdo. Waxaa maamula dhismahan DJI. Waxaad halkan u joogtaa maadaama aan laguu ogolaanin inaad soo gasho Nederlaan. Shaqaalaha-DJI waxey xiran yihiin dirays. Iyaga ayaa ku daryeelaaya iyo ku hagaaya mudada aad joogto xaduudka la seexdo. Dacwada xaduudka lama kulmeysid CAO, GZA iyo sikuuratiga.
www.dji.nl

## Keydinta xogta gaarka ah

Xogta gaarka ah waa dhamaan warbixin adiga kugu saabsan. Ururada la shaqeeyey qoritaanka qoraalkan hoos ayey ku qoran yihiin. Ururadaan wey isticmaalaan xogta shaqsiga mudada codsigaaga laga shaqeynaayo, soo gudbinta ama codsiga. Waxey ku weydiinayaan warbixintaada iyo ururada kale ama dadka kale hadii loo baahdo. Ururadaan waxey isticmaalaan iyo keydiyaan warbixintaada iyo waxey u sii gudbiyaan ururo kale haddii taasi sharci ahaan qasab tahay.
Sharciga xogta shaqsiga waxaa ku qoran waajibaad saaran ururada warbixinta isticmaala. Waa iney si sax ah iyo amaan ah warbixintaada u isticmaalaan. Sharciga xogta shaqsiga waxaa kaloo ku qoran xaquuqdaada. Haddii aad weydiisato, waxaad leedahay tusaale ahaan xaquuqda soo socda:

- inaad aragto warbixintaada ururada haaya;
- ogaato waxa ay ururada ku sameynayaan warbixintaada iyo sababta;
- ogaato ururadee warbixintaada loo gudbiyey.

Ma rabtaa inaad wax dheeraad ka ogaato isticmaalka xogtaada shaqsiga iyo xaquuqdaada? Markaa fiiri websaaytyada ururadaasi.

## Su'aalaha marar badan la weydiiyo

**Xagee joogayaa mudada dacwada Dublin?**
Mudada wareysiga Dublin waxaad degan tahay xerada dejinta ee COA. Ma go'aamisey IND ka dib in codsigaaga hadana Nederlaan ka hawl gasho? Markaa waxaad aadeysaa xero dejinta oo u dhow xafiiska -IND: xerada shaqada (POL). Halkaa ayaa ku mareysaa Dacwada guud ee magangelyodoonka". Ma ka weydiisatay xaduudka Nederlaan magangelyo (xagga hawada-ama dekeda badda)? Ma waxaa ku jirtaa xabsiga ajaanibta markaa waxaad joogeysaa dhismo xiran oo ah Schiphol, Zeist ama Rotterdam.

**Ma qabtaa su'aalo ka dib markaad qoraalka aqrisey?**
Waxaad su'aalahan weydiin kartaa garyaqaankaaga ama shaqaalaha COA, IND ama VWN.

**Ma qabtaa ashtako?**
Dhamaan ururada ku shaqada leh dacwada magangelyada, waxey u shaqeeyaan si shaqaalenimo iyo sax ah. Ma kula tahay in si aan wanaagsaneyn kuula dhaqmay urur? Markaa ashtako ayaa gudbin kartaa. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawin kara.

Qoraalkan waxaa soo wada saaray:
Qeybta Boliiska Ajaanibta, Aqoonsiga iyo Ka ganacsiga Dadka (AVIM)
Nidos
Waaxda Hay'adaha Cadaalada (DJI)
Ururka dejinta Magangelyodoonka (COA)
Adeega-Imigrashanka iyo Jinsiyada (IND)
Ciidanka Ilaaliya xaduudka (Kmar)
Guddiga taageerida Sharciyada (RvR)
Urur qaxootiga Caawiya Nederlaan (VWN)
Ururka Caalamiga ee Muhaajiriinta (IOM)
Waaxda Dib u Noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V)

Oo ay soo dalbeen:
Wasaaradda Cadaalada iyo Amaanka, maamulaha maamulka Imigrashanka
www.rijksoverheid.nl

Qoraalkan waxa ku qoran wax xaquuq ah kama soo saari kartid. Haddii tarjumaada ay dhaliso fahmid qalad ah, markaa mida Nederlaanka ayaa la raacayaa.